

Insuulinta iyo guluukoosta dhiiga ee wadata nooca 1 cudurka sonkorta

Sababtee ayaan u qaadanayaa insuulinta?

Nooca 1 cudurka sonkorta, jidhka waxaa dhib ka soo gaadhaa la'aata insuulinta. Unugyada caadi ahaan sameeya insuulinta ayaa la burburiyaa, iyadda oo keenta heerarka sare ee guluukoosta dhiiga iyo dareenka jirada. Si loo dheeli tiro guluukostaada dhiiga, insuulin waa lagu shubaa jirka iyadoo la isticmaalayo mudditaanka insuulinta maalin laha ah ama bamka insuulinta. Haddii aanu jirku helin insuulin, waxaa kugu dhici kara cudurka ketoacidosis, taas oo ah mid darran oo suuragal ahaan nolosha halis gelinaysa.

Sababtee ayaan u qaadanayaa insuulinta?

Sababtee ayaan u baarayaa guluukoostayda dhiiga laftaydu?



Baaritaanada guluukoosta dhiiga caadiga ah waa qayb muhiim ah oo daawaynta cudurka sonkorta ah.

Waxaad go'aamisaa inta badan inaad baarto guluukoosta dhiigaaga kala hadalka iyadda kooxdaada cudurka sonkorta. Addoo cabbiraya guluukoostaada dhiiga, waxaad ka heli kartaa wax ku saabsan nisbada udhexaysa nafaqadda, jimicsiga iyo guluukoosta dhiiga. Ka sokow nafaqada iyo jimicsiga, guluukoosta dhiiga waxaa saamayn kara walbahaarka, xumada iyo caabuqa, iyo dawooyinka kale. Baaritaanada guluukoosta dhiiga sidoo kale waxay caawisaa go'aaminta haddii aad u baahantahay inaad ku habbayso qadarka insuulintaada ah oo waxay kaa caawiyaan guluukoosta dhiiga aadka u hoosaysa.

Heerkaaga yoolka gaarka ah ee soonta guluukoosta iyo guluukoosta wakhtiga cuntada waxaa lagu go'aamiyaa falanqaynta kooxda cudurka sonkorta. Guud ahaan waxaa lagu taliyaa in guluukoosta dhiiga ay u dhexayso:

4-6 mmol/l – subaxda iyo cuntadda ka hor

4-8 mmol/l – 2 ka dib cuntadda

Nooca 1 cudurka sonkorta, jirka waxaa dhib ka soo gaarta la'aanta insuulinta, taas oo ka dhigta guluukoosta dhiiga mid aad u saraysa. Si loo dheeli tiro guluukostaada dhiiga, insuulin waa lagu shubaa jirka iyadoo la isticmaalayo mudditaanka insuulinta maalin laha ah ama bamka insuulinta.

Sababtee ayaan u baaraya guluukoostayda dhiiga laftaydu?

Waa maxay soonka guluukoosta iyo guluukoosta wakhtiga cuntadda?

Sonka sonkorta/soonka guluukoosta waxaa la qiyaasaa subaxda ka dib marka aanad waxba cunin habeenkii.

Guluukoosta wakhtiga cuntadda waxaa la qiyaasaa labo saacadood ka dib cuntada oo waxay sheegtaa sida jirkaagu ula macaamilo tamarta ka timaada cuntada.

Waa maxay guluukoosta dhiiga ee hoose?



Guluukoosta dhiiga aadka u hoosaysa waxaa loo yaqaanaa hypoglycaemia. Haddii guluukoosta dhiigu ay ka hoosayso 4 mmol/l, waxaad u baahantahay inaad qaadata shay macaan si aad u kordhiso guluukoosta dhiiga.

- Qaado degestaroos (3 giraam kii 10 kg ee miisanka jidhka).
- Cab biyo,
- Mar labbaad qiyaas guluukoosta dhiigaaga ka dib ugu dhowaa 15 daqiiqo.
- Ku celi haddii ay lama huraa tahay.

Haddii aanad haysan wax degastraos ah, qaado qaybo sonkor ah, khudrad, cabitaan, Cabitaanka fudud ama shay kasta oo macaan. Guluukoosta hoose ee dhiiga waa in had iyo jeer la daweyyaa isla markaaba markaas uma yaraanayso heerarka hoose ee xad dhaafka ah. Haddii guluukoosta jirku ay aad u hoosayso, waxaa jira khatarta miyir beelka.

Guluukoosta dhiigu waxa uu saameeyaa sida aad dareento, iyo sidoo kale caafimaadkaaga xiliga dheer. Baarista guluukoostaada dhiiga laftaadu sidaas awgeed waa muhiim.

Addoo baaraya laftaadu, waxaad ogaan kartaa sida guluukoosta jirkaaga ay u saameeyaan cuntooyinka kala duwan, jimicsiga iyo daawaynta insuulinta.

Calaamadaha sonkorta dhiiga hoose waxay noqon kartaa:

- Dhidad, gariir iyo garaacyo wadnaha
- Weji macbuus, gaajo
- Cuncun
- Madax xanuunka
- Dareen soo jeed yaraada, hadal aan la fahmi karin
- Arag aan caadi ahayn

Haddii aad u baahantahay macluumaad dheeraad ah, waxaad waydiin kartaa kalkaalisada ama dhakhtarkagaa. Sidoo kale waxaa lagugu soo dhowaynayaa inaad la xidhiidho Macluumaadka Caafimaadka xaga Lilly.

Telefoonka: 08-737 8800
Iimayl: scan_medinfo@lilly.com